

# Naga caawi sidii aan u Abuuri lahayn Dugsiga Sare ee Cleveland (Cleveland High School) oo Casri ah



## Qorshaha dugsiga cusub

Taariikhdu markay ahayd Maajo 7deedii, 2024, Guddiga Dugsiga PPS wuxuu meelmarayay qorshe dhammaystiran oo loogu tala galay Dugsiga Sare ee Cleveland (Cleveland High School) kaasoo ah mid cusub oo dabaqyo badan ah, guud ahaanna koronto ku shaqaynaya, oo 315,000 oo talaabo oo labajibaaran ah kaasoo laga dhisaayo goobta 4-ta acre ah ee hadda diyaarka ah. Qorshuhu wuxuu dugsiga ka dhigayaa qayb fasalo ah iyo goob jimicsiga jirka/farshaxanka lagu barto asagoo sidoo kale leh barxad banaan oo balaaran, oo ku taala bartamaha dugsiga. Wadada laga soo galaayo waxay hadda ku ooli doontaa geeska SE 28th Avenue.

## Macluumaadka Xagaaga 2024

Naqshadda dugsigu waa ay sii soconaysaa. Kooxda mashruucu waxay dhexda uga jiraan wajiga qaabka naqshadda ayaga oo fahamka lagu diyaariyay qorshaha dhammaystiran u badalaya naqshado loogu tala galay qaybaha kala duwan ee dhismaha iyo qaybaha barnaamijka. Waxay si joogto ah ula kulmaan Kooxda Ka tala bixinta Naqshadda ee CHS (Design Advisory Group (DAG)), kuwaas oo wax ku biiriya horay usii wadista tafaasiisha naqshadda. Kooxdu waxay matalaysaa iskujirka ardayda, shaqaalaha, waalidiinta, iyo xubnaha bulshada.

## Meelaha Muhiimka ah ee Qorshaha

Dhismaha afarta dabaq ah wuxuu dugsiga ka dhigayaa qayb fasalo ah iyo goob jimicsiga jirka/farshaxanka lagu barto asagoo sidoo kale leh barxad banaan oo balaaran, oo ku taala bartamaha dugsiga. Naqshadda waxaa kujira laba xarumood oo cusub oo loogu tala galay jimicsiga iyo jaaska iyo lagdinta. Goob loogu tala galay masraxada bandhigyada oo 500 oo kursi qaadda iyo tiyaatar midab madow leh. Dhismaha oo ah mid korontadu aad ugu filantahay wuxuu yarayn doonaa raadadka kaarboonka wuxuuna soo saaran doonaa tamarta soolarka oo uu isagu leeyahay. Naqshadda waxaa sidoo kale kamid ah casriyaynta waddada iyo goobta garoonka ah iyo meesha baarkinka ah.

## Fursadaha ka qaybgalka ee soo socda

Inta lagu jiro wajiga naqshadda dhowr siminaar oo kale, tababro iyo kulamo bulshada lala yeelanayo ayaa la qaban doonaa bilaha soo socda. Fadlan bookho websaytka mashruuca si aad u hesho macluumaadkii ugu danbeeyay.

## Jadwalka Mashruuca

Qorshaynta iyo naqshadayntu waxay bilawdeen xagaagii 2023 waxayna sii socon doonaan labada sanno ee soo socota.

## Jadwalka Dhismaha

Barnaamijka maalgalinta (Bond Program) ee 2020 kuma jirto maalgalinta dhismaha Dugsiga Sare ee Cleveland. Lacagta mustaqbalka waxaa loo baahan doonaa inay ka timaado sanduuqa horumarinta mustaqbalka maaliyadeed ee PPS. Guddiga Dugsiga PPS wuxuu soo jeedinayaa in lagu daro codaynta maalgalinta Maajo 2025. Haddii maalgalinta mashruuca la helo Maajo 2025, wuxuu dhismuhu bilaaban doonaa Juun, 2026, wuxuuna sii socon doonaa labada sanno ee soo socota. Cleveland ka cusub wuxuu furmi doonaa Xagaaga, 2028. Cleveland mới sẽ mở cửa vào Mùa Thu năm 2028.

## Si joogto ah u bookho websaytka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

Websaytka casriyaynta Cleveland, [www.pps.net/ClevelandBond](http://www.pps.net/ClevelandBond) wuxuu ku siin doonaa horumaradii ugu danbeeyay ee uu mashruucu sameeyay iyo liiska fursadaha ka qaybgalka ee soo socda.



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS